

ADEEGYO BADAN... HAL MEEL.

Hageyaal kaa caawinaaya inay kugu xiraan adeegyada loo baahan yahay, ayna ku jiraan qorshaynta badqabka, dheefaha dadwaynaha, guriyaynta iyo baahiyaha kale.

La taliyaal iyo dhakhaatiir taageeraaya dadka waawayn iyo carruurta la daalaa dhacaaya dhacdooyinka naxdinta leh kadib dagaalka.

Adeegyada xoojinta dhaqaalaha si gacan looga gaysto dhisida, kaabista daynta, iyo xaaladaha dhaqaalaha. Ku xirista barnaamijyada tababarka iyo waxbarashada shaqada.

Qareenno talo kaa siinaaya arimaha guriyaynta, amarada difaaca, taageerada ilmaha, masuuliyada ilmaha, booqashada ilmaha, socdaalka, iyo furiinka.

Dacwad oogeyaal taqasus leh iyo sharci fulin.

Daryeelka carruurta ee goobta inta aad adeegyada helayso.




Marka aad joogto PorchLight, kaligaa ma tihid.


Xarunta Cadaallada Qoyska waa albaabka laga galoo shabakad adeegyo ah oo loo sameeyay inay yareeyaan dagaalka. Marka aan yarayno imaatinka dagaalka, waxaan kor u qaadaynaa badqabka dadwaynaha, waxay caawinaynaa yaraynta heerarka danbiyada guryaha, waxaan bulshada u midaynaynaa taageerista dhibaneyasha iyo dadka kasoo badbaada dagaalka, waxaana kordhinaynaa waxtarka adeegyo waqtiga ku haboon la baxsho. Waxaan u taagan nahay jebinta mareegta dagaalka iyo ilaalinta badqabka bulshada.

Fadlan booqo www.porchlightfjc.org si aad xog ugaogaato:

- Sida loo mutadawaco.
- Sida deeq loo baxsho.
- Sida aad u hesho adeegyo aad u rabto naftaada ama qof u baahan.



PorchLight, Xarunta Cadaallada Qoyska
11100 W. 8th Ave., Suite 200, Lakewood, CO 80215
303-271-6100 • www.porchlightfjc.org



Shaqadeena waa inaan midayno adeegyada muhiimka ah ee dhibaneyasha, dadka dagaalka ka badbaada iyo carruurtooda si loo abuuro hormar wanaagsan mustaqbalka, loona kobciyo badqabka dadwaynaha.

PorchLight
A Family Justice Center
You are not alone.

11100 W. 8th Ave., Suite 200, Lakewood, CO 80215

www.porchlightfjc.org

303-271-6100

Saacadaha Shaqada: 8:30 GH a.m.-4:30 p.m.
Dadka bilaa balanta yimaada waa la aqbalayaa.
Looma baahna balan.




Maxaan u dooranayaa PorchLight?

Haddii qof lagu weeraro horta ilmihiisa, ama uu si kale u noqdo dhibaha dagaal, qoyska ayaa loo gudbiyya wakaado badan oo bulshada kamid ah si ay u helaan adeegyada ayna u bilaabaan bogsasho. PorchLight waxay adeegyada iskugu gaynaysaa hal meel, taasoo yaraynaya safarka, codsiyada, tirada waqtiyada uu qofku u baahan yahay inuu qisadiisa ka sheekeeyo, waqtiga shaqada laga maqnaanaayo, iyo baahiyaha daryeelka carruurta. Looma baahna inuu jiro kiis danbi si loo adeegsado adeegyadaan, dhammaan adeegyadana bilaash ayuu ku helayaa dhibanaha ama qofka dhibka ka badbaaday.

Xog ku saabsan Xarunta

PorchLight, Xarunta Cadaallada Qoyska ayaa u adeegta ismaamullada Je~~l~~erson iyo Gilpin. In ka badan 75 kamid ah wakaalladaha nala shaqeeya ayaa iska kaashada bixinta adeegyo isku dhafan oo la siyo dhibaneyaasha iyo dadka ka badbaaday rabshada. Anagoo adeegsanayna koox xirfado kaladuwan leh oo ka wada shaqaynaaya hal goob iyo hawlahaa isku dubaridka oo wakaalad kasta ka jira, waxaan si waxtar leh ugu adeegaynaa dhibaneyaasha iyo dadka ka badbaada weerarka galmada, rabshada qoyska, ku xadgudubka waayeelka, ku xad gudubka carruurta, xadgudubka dadka khatarta ku jira iyo tahriibinta aadanaha.



**“Xarunteena Cadaallada Qoyska
waa meel diiranaan iyo soo
dhawayn leh**

halkaasoo adeeg bixiyaal kaladuwan iskugu yimaadaan si ay u caawiyaan dhibaneyaasha, dadka ka badbaaday rabshada iyo carruurtooda si ay u helaan adeegyada muhiimka ah. oo dhammaan hal meel la iskugu keenay.

~ Candace Cooleedge, Agaasimaha Fullinta

**“Ma doonayn inaan sheekadayda
ka sheekeeyo malaayiin jeer...
in kuligeed aan hal meel ku sheego
waa arin cajib ah.**

~ Qof rabshad soo maray